

QASHINKA

Qashinka oo bacda ku shub oo ku dhex rid kan qashinka aad ku rido.



WARQADDAHA AAN DIB LOO WERSHADAYN



Oo ay ku jiraan:

- Masaxaddaha qashinka lagu daro • Buugaagta jaldiga adag
- Warqadaha hadiyadaha lagu duubo ee alumiiniyanka ka sameysan
- Saxuunta dahaarka leh ee xaashida ka sameysan dhalaalana
- Warqadda istaraashada ah ee wajiga la isaga masaxo
- Warqadda la jarjaray/go'go'an (TALO: Iyagoon bac lagu ridin oo aan la isku xirin ayaa warqadda qashinka la dhaxgelin karaa)

BIRTA AAN DIB LOO WERSHADAYN



Oo ay ku jiraan:

- Koobabka, daboolka koobka (3 inji in kayar (7.6 cm) ee dhexroorka gudaha) • Weelalka/caaga saliida eber ka dhig
- Qansacadaha ranjiga eber ka dhig (Ka saar furka gansaca, ranjiga qallalsan/ku enjegay, ku adkaaday waxba ma dhibayaan)
- Birta afka leh ama birta dufanta leh

QURAADADAHA/DHALADA AAN DIB LOO WERSHADAYN



Oo ay ku jiraan:

- Dhalada muraayadda • Galoobka nalka (Galoobka nalka faloorisanka [galoobka nalka wareegga] ah iyo tubooyinku qaab gaar ah ayaa loo qubaa)

CAAGAGGA BALAASTIIGGA EE AAN DIB LOO WERSHADAYN



Isku arruuri bacaha oo dhan kuna dhex rid hal bac kadibna ku celi dukaanka cuntada laga soo iibsado si dib loogu warshadeeyo.

Oo ay ku jiraan:

- Weelka walxaha xumbada ka samaysan (foam)
- Saxuunta balaastiigga ka samaysan
- Koobabka iyo daboolka yaryar ee koobka
- Eber ka dhig/faaruqi caagaga daawooyinka dhakhtarku qoro lagu shubo

QASHINKA KALE



Oo ay ku jiraan:

- Dambaska qabow • Baacaha faakuumka iyo busta ku jirta • Agabka/alaabta xafiska ee jajabsan • Saxarada xaywaanka guriga jooga, qashinka bisadda/mugulaasha • Bacaha cuntada, daawooyinka, iyo waxyaabaha dadku isticmaalo lagu keeno iyagoo sejalaata ah/diyaarsan

Waxyaalaha ay ku qoran yihiin "Dangerous, Poisonous, Caution, Warning" (Halis, Sun ah, Taxadir, Digniin) waa in loo qaadaa si taxadar leh. Fadlan si haboon u qub qashinka guriga ee aan la rabin ee halista ah. Booqo lhwp.org ama wac 206-296-4692 si aad tafasiil u hesho.

TILMAAMAHA QASHINKA

Fadlan:

- Qashinka oo dhan bac ku rid
- Saxarada xayawaanka, qashinka xayawaanka, isbuunyada xumbada ka sameysan ee loo isticmaalo in lagu ilaaliyo alaabta dhaqso u jabta, busta faakuumka, qashinka alwaaxa iyo dambaska qabow.

QASHINKA DHEERAADKA AH

Lacagta la iska qaado ee qashinku waxay ku xiran tahay xajmiga gaariga qashinka. Waxaa jira lacag dheeraad ah oo la iska qaado marka ay jiraan qashin dheeraad ah ee aanu qaadayn weelka qashinka. Haddii weelkaaga qashinka uu furan yahay in ka badan haddii buudhigaaga qashinku uu furan yahay

kabandan 6 inji (15.2 cm), lacag dheeraad ah ayaa lagu soo dalacayaa. Waxyaalaha waawayn sida joodariga, qalabka korontada ku shaqeeya ee guriga kuu yaalla iyo qalabka dhismaha waqti oo la qaadayo ayaa lagu qabanayaa.